# Cirbada xanuun baabi'iyaha ee dhabarka laisaga duro xilliga foosha (epidural)

the women's
the royal women's hospital

## Waa maxay epidural?

Epidural waa nuuc ka mid ah xanuun baabi'iyaha oo yareysa xanuunka foosha.

Dhakhtar ayaa wuxuu gelinayaa tuubo yar oo balaastiig ah, oo loo yaqaan kateetarka epidural'ka, laf dhabartaada agteeda (meesha epidural'ka). Daawooyinka xanuunka yareeya waxaa jirka lagu gaarsiiyaa tuubo  si ay u xannibaan xanuunka neerfaha ee lafdhabartaada. Tani waxay yareyn kartaa xanuunka ilaa inta uu ilmuhu ka dhalanayo.

Cirbada xanuun baabi'iyaha ee dhabarka laisaga duro xilliga foosha (epidural) ayaa ah nidaamka ugu fiican ee xanuunka lagu yareyn karo xilliga foosha iyo dhalmada.

## Waa maxay faa'iidooyinka epidural'ka?

Haddii ilmahaagu u baahan yahay in xoog  lagu soo jiido ama qalliin degdeg ah, epidural'ka ayaa kaa caawin kara in howlahaas si dhakhsi ah loo bilaabo.

In cirbada xanuun baabi'iyaha ee dhabarka laisaga duro (epidural'ka) xilli hore lagaaga sii duro dhabarka waxay la macno tahay inaan loo baahnayn lagugu duro cirbada suuxdinta xilliga dhalmada, si aad u soo jeeddo marka aad dhaleyso.

Cilmi-baaris la sameeyay ayaa waxay muujinaysaa in epidural'ka aysan si toos ah u saameynayn ilmahaaga ama aysan kordhinayn fursadda laga yaabo inaad u baahato qalliin degdeg ah.

## Sidee dhabarka loo geliyaa tuubada epidural'ka?

Takhtarka wax suuxiya ayaa jirka gelin doona epidural-ka. Tani waxay qaadanaysaa ilaa 20 daqiiqo.

- Faleenbo ayaa lagaa siin doonaa gacantaada ama cududda si ay dareere kuu siiso.
- Hal dhinac ayaad u jiifan doonaa ama waad soo fadhiisaneysa marka howshaas la sameynayo.
- Dhabarka ayaa waxaa lagaaga nadiifin doonaa wax qaboow oo jeermiska dila
- Cirbada wax suuxisa ayaa laguugu duri doonaa si ay maqaarka dhabarkaaga uga dhigto meel aan wax dareen ah lahayn.
- Waxaa laga yaabaa oo keliya inaad dareento taabashada dhabarka lagaa taabanayo marka cirbada epidural-ka meesha lagu mudayo. Inaadan is nuuxnuuxin inta ay howsha socoto ayaa wax kasta fududeyn karta iyadoona sidoo kale yarayn karta fursada laga yaabo inaad dhibaatooyin kala kulanto.
- Waxa laga yaabaa in aad wax jirkaaga ku sosocda oo kale ka dareento dhabarka ama lugahaaga marka tuubada epidural'ka meesha la geliyo. Tan wax khatar keeni kara maaha.
- Marka cirbadda epidural-ka meesha laga saaro ka dib, tuubada ayaa koolo lagula dhejin doonaa maqaarkaaga.
- Daawooyinka wax suuxiya ayaa kusii qulquli doona tuubada waxayna qaadan doontaa 10 ilaa 20 daqiiqo inta ay ka shaqeynayso.

## Epidural-ka side ayuu kuu saameeynayaa?

Epidural'ka ayaa laga yaabaa in uu ka dhigto lugahaaha inay dareemaan culeys, markaa waxaad u baahan doontaa inaad sariirta jiifto.

Waxa kale oo laga yaabaa in ay kugu adkaato in aad dareento marka kaadihaystaadu buuxsanto, markaa waxaad u baahan doontaa tuubada kaadida.

Waxaa laga yaabaa inaad dareento qarqaryo, cuncun, ama kuleel yar.

Cirbada epidural'ka waxay mararka qaar dheereyn kartaa fooshaada ama waxay kor u qaadi kartaa baahida loo qabo in biro lagaaga soo jiido ilmaha markaad dhaleyso.

Waxa kale oo ay  isbeddel u keeni kartaa garaaca wadnaha ilmahaaga. Waxaan si taxadar leh ula socon doonaa wixii isbeddel ah ee ku yimaada xaaladaada iyo xaalada lmahaaga.

## Maxaa khatar ah oo ka dhalan kara?

Cirbada epidural-ka waa mid badbaado ah, balse dhibaatooyin kale (side effects) ayay lahaan kartaa.

Dhibaatooyinka badi ka dhasha waxaa ka mid ah hoos u dhac u yimaada cadaadiska dhiigga iyo suurtagalnimada inay wax xirmaan, kuwaas oo aan daweyn karno.

Dhibaatooyinka kale ee marmar dhif ah ka dhalan karaa waxaa ka mid ah madax-xanuun aad u daran

Dhibaatooyinka aad dhifka u ah waxaa ka mid ah dhaawac ku meel gaar ah oo ku yimaada neerfayaalka, caabuq, epiduralka oo si sare wax u xanniba, iyo epidural'ka oo keena in dhiiga uu xinjiro noqdo. Dhaawac daran ama in qofku uu cuuryaan noqdo aad ayey dhif u tahay.

## Wixii macluumaad dheeraad ah

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, la hadal dhakhtarkaaga dhalmada ama umulisadaada. Waxay kuu sameyn karaan fursad aad kula hadasho takhtarka suuxinta.

**Adeegga Xanuunka Daran, (Acute Pain Service),**

**Isbitaalka Haweenka ee Royal**

Isniinta ilaa Jimcaha 8-da subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo
Taleefanka: (03) 8345 2389

## Ma u baahan tahay turjubaan?

Interpreter

Waad codsan kartaa turjubaan haddii aad u baahan tahay turjubaan.

## Taageerada Rabshadaha Qoyska

**1800 Respect National Helpline (Xushmada Khadka Caawinta Qaranka)**

Waxaad heli kartaa caawimo haddii aad la kulantay xadgudub galmo, rabshad guri ama qoys iyo xadgudub. Waxaad wici kartaa xilli kasta oo habeen iyo maalinba ah.
1800 737 732
1800respect.org.au

**Cudurdaar:** Xaashidan xaqiiqda waxa ku qoran waa macluumaad guud oo keliya. Wixii talooyin adiga kuu gaar ah ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ama tan ilmahaaga, waa inaad talo ka raadsataa dhakhtarkaaga. Royal Women's Hospital masuul kama aha khasaare ama dhaawac ka dhasha ku tiirsanaanta aad ku tiirsan tahay xaashidan halkii aad kala kulmi lahayd dhakhtar. Haddii adiga ama ilmahaaga aad u baahan tihiin daryeel caafimaad oo degdeg ah, fadlan la xidhiidh waaxda gurmadka degdegga ah ee kuugu dhow.
© The Royal Women's Hospital 2025